# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF ..........

DATE : ..........



# Sharci Lambar 94/96

Tar: 16 November 1996
H a r g e y s a

**PRISONS LAW.**
**SHARCIGA XABSIYADA.**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 14aad xubintiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo Qodobka 24aad ee Axdi Qàrameedka JSL. |
| MARKUU Tixgeliyey: | Baahida loo qabo Sharciga Ciidanka Xabsiyada. |
| MARKUU Aqoonsaday: | Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaalada iyo. |
| MARKUU HELAY: | Ogolaanshaha Golaha Wasiirada JSL. |
| MARKUU HELAY: | Ogolaanshaha Golaha Wakiilada |

## Wuxuu soo saaray sharcigan

### QAYBTA KOOWAAD

### Qodobka 1aad
### QEEXID.

Hadaan si kale loo sheegin, Sharcigan waxaa loola jeedaa:-

| | |
|---|---|
| Wasiir: | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Caddaaladda. |
| Taliye: | Waa Taliyaha Ciidanka Asluubta. |
| Ciidanka Asluubta: | Waxaa loola jeedaa Ciidanka Asluubta ee J.S.L. |
| Maxaabiista Caruurta ah: | Waxaa loola jeedaa Maxbuus kasta oo ka yar 18 Sanno. |
| Maxaabiista Xabsiga Dheer: | Waxaa loola jeedaa Maxbuus kasta oo ku Xukuman Sannad wax ka badan. |

## QAYBTA SADEXAAD.
## MAAMULKA XABSIYADDA.

### Qodobka 5aad
### MAAMULKA & BAADHISTA XABSIYADA WAXAY SAARANTAHAY TALIYAHA.

1) Maamulka & Baadhista Xabsiyada oo dhan & amaradda Ciqaabta la xidhiidha waxaa u xilsaaran Taliyaha Ciidanka Asluubta.

2) Taliyuhu waa inuu booqdaa, oo baadhis ku sameeyaa xabsiyadda oo dhan ugu yaraan hal mar Sanadkii & Meelaha kale ee dhaqan celinta, waana inuu warbixin ka siiyaa Wasiiirka booqashadiisaas & baadhistiisaasba.

3) Amar kasta oo lagu sheegay sharciga ama hab kale oo waafaqsan sharci oo uu soo saaray taliyuhu, oo ay waajib tahay in la sameeyaa ama uu amro Taliyuhu, waa inuu fuliyaa ama lagu amraa taliye-xigeenka Ciidanka ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Asluubta.

### Qodobka 6aad
### XABSI KASTA WUXUU LEEYAHAY SARKAALKA TIRADA IYO SOO DHAWEYTNA AMA (NCO)OO UU MAGACAABO SARKAALKA MADAXDA AHI

a) Taliyuhu waa inuu magacaabo Sarkaalka Madaxda ah ee xabsi kasta & meelaha kale ee dhaqan celinta ah, Sarkaalkaas oo Masuul ka ah, Mamulka Xabsiga & dhaqan celinta.

b) Meeshii aan loo magacaabin Sarkaal Madax ah ee Xabsi ku yaal waxaa madax u ah Xabsigaas Duqa Magaaladda ee uu ku yaalo Xabsigu.

Gudoomiyaha degmaddu wuxuu raacayaa amarka Taliyaha Ciidanka, Marka loo eego maamulka Xabsiga, waxa kale oo uu raacayaa amarkasta uu soo bixiyo Taliyaha Ciidanku ee uu fulin lahaa Sarkaalka Madaxda ah ee Xabsigaas.

### Qodobka 7aad
### AWOODAHA GUUD EE SARKAALKA (NCO) AMA SARKAALKA TIRADA IYO DHAWEYNTA.

Hawl kasta & Amarkasta oo Sharcigan lagu sheegayo oo lagu amraayo Taliyaha waxaa fulinaaya isagoo raacaya Amarka Taliyaha, Sarkaalka Madaxda ah ee Xabsiga & Dhaqan Celinta ee Taliyuhu magacaabay.

### Qodobka 8aad
### HAWLAHA GUUD OO UU QABANAAYO SARKAALKA MADAXDA AHI.

Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu kormeerayaa ama baadhis ku samaynayaa hawlaha la xidhiidha Xabsiga oo dhan & kuwa dhaqan Celinta ee loo xilsaaray, wuxuuna Masuul ka yahay Akhlaaqda & Daawaynta Xubnaha & Maxaabiista uu Madaxda u yahay, waxa kale oo uu kormeerayaa fulinta & ku dhaqanka Shuruucda & Amarada Xubnahaas & Maxaabiistaba.

**Qodobka 9aad**
**MASUULIYADDA KA SAARAN SARKAALKA MADAXDA KA AH BAKHAARADDA & IWM.**

1) Sarkaalka Madaxda ka ah Bakhaaradu wuxuu masuul ka yahay Xafidaada Hubka,Rasaasta, Dharka, & Dhamaan Bakhaaradda, Alaabta & Cuntada loo soo diray oo ay isticmaalayaan Xubnaha & Maxaabiistu.

2) Waxa kale oo uu masuul ka yahay lacagta, dhammaan alaabta qiimaha leh, dharka iyo dhammaan alaabta ay leeyihiin maxaabiistu ee lagu aaminay, waana in uu tirsadaa, waana in la tiriyaa, hadii wax ka lumaan ama khasaare gaadho, ama haddii ay dhacto tuugo, dhac ama haddii la baabiiyo sida ku xusan qodobka 20 xarafkiisa labaad, Markii Alaabkasta oo aan ku soo sheegnay Xarafka hore ay lunto ama khasaare Gaadho Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu hubinayaa, lumida ama khasaaraha dhacay & qofka ama dadka gaar ahaan uga Masuulka ah Arintaas, markii uu helo Sarkaalku,hubinta Masuulka ka ah, wuxuu ka jarayaa Mushaaharka Xubintaas si tartiib-tartiiba alaabta la waayay ama khasaaruhu ku yimid, isagoo Taliyaha Warbixin siinaya, haddii Arrintu aysan ahayn dambi wayn.

**Qodobka 10aad**
**AWOODDA LOOGA QAADI KARO MAXAABIISTA SAWIRKA & FARAHA.**

Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu amri karaa, in Maxaabiista ama Maxbuus gaar ah laga qaado Sawir ama Saxeex Faraha, Maxbuus kasta oo dambi Ciqaabeed lagu Xukumo.

**Qodobka 11aad**
**BUUGAAGTA IWM EE UU XAFIDAAYO SARKAALKA MADAXDA AHI.**

Sarkaalka Madaxda ahi waa in uu xafidaa Buugaagta, Dekumantiska, joornaaladda IWM, oo lagu Sheegay Sharciga ama xeernidaamiyaha.

**Qodobka 12aad**
**BOOQASHOOYINKA SARKAALKA MADAXDA AH.**

Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu booqasho ku samaynayaa xabsiga Maalin kasta, isaga oo eegaya xabsiga, wuxuuna eegayaa marka uu doonaayo, Qolalka Maxaabiista Gudahooda ama meelaha dhaqan celinta, waxaana lagu faah-faahin doonaa xeer-nidaamiyaha ama Amarada joogtada ah.

**Qodobka 13aad**
**XUBNO CIIDANKA MILETERIGA AMA BOOLISKA AH OO SI KU MEELGAADH AH LOOGU XOOJIYO INAY SHAQADA LAQABTAAN CIIDANKA ASLUUBTA.**

1. Markii Xabsi kasta, aysan ku filayn Nabad-gelyadiisa & Maamulkiisa Ciidanka Asluubta ee jooga, waxaa si ku meel-gaadh ah loogu xoojin karaa xubno ka socda Ciidamada kale ee dawladda, sida Booliska iyo Milatariga.

2. Xubin kasta oo ka mid ah Ciidamadda Milatariga ama Booliska ee lagu sheegay Xubinta hore, wuxuu leeyahay awooda & shaqada ay qabanayaan Ciidanka Asluubtu, wuxuuna ka tirsanyahay Ciidanka Asluubta, inta uu Shaqadaas hayo, waxaana ku waajib ah inuu fuliyo, dhamaan Sharciyada, Xeer-nidaamiyaha & Awaamiirta Ciidanka Asluubta Saaran.
3. Markii ay jirto in Maxaabiis Xabis kale ama dhaqan Celin loo wareejinaayo, oo aan Ciidanka Asluubtu ku filayn Ilaalinta (ESCORT), Xubin kasta oo Ciidanka Nabad-gelyada ah ayaa loo Xilsaari karaa inay fuliso, Xubnahaas oo la Awood & Waajiba ah xubnaha Ciidanka Asluubta, waxaa kale oo ay la wadaagaan Masuuliyadda, Anshaxa, & Ciqaabta Ciidanka Asluubta.

**Qodobka 14aad**
**WAAJIBAADKA XEER ILAALIYAHA GUUD & XIDHIIDHKA UU LA LEEYAHAY XABSIYADDA & MAXAABIISTA.**

1. Xeer Ilaaliyaha Guud ama ku Xigaankiisu, wuxuu kor meerayaa Xabsiyada isaga oo eegaya Xaaladda Caafimaad & Nolosha Maxaabiista.
2. Xeer Ilaaliyaha Guud ama ku Xigeenkiisu, wakhti kasta oo uu arko inay ku haboontahay, wuxuu baadhis ku samayn karaa Xabsi kasta & Meel kasta oo dhaqan Celin ah & Maxaabiista, wuxuuna Su'aalo waydiinayaa Maxaabiista haduu doono, wuxuu qoraal gaaban ku qori karaa buuga Xabsiga ama dhaqan celinta, Sarkaalka Madaxda ahi daahid-la'aan waa in uu u gudbiyaa Taliyaha wixii uu ku qoray Xeer Ilaaliyuhu Buugaas isagoo Warbixintiisa raacinaaya.

**QAYBTA AFRAAD.**
**DAAWAYNTA & SAMAFALIDDA GUUD EE MAXAABIISTA.**
**WAAXDA KOOWAAD.**
**SOO GELIDA, HAYNTA & ILAALINTA MAXAABIISTA.**

**Qodobka 15aad**
**SOO GELIDA MAXAABIISTA.**

1. Majiro qof soo gelikaraa Xabsiga hadii uuna la Socon Waaran Maxkamadeed ama amar guddiga nabadgelyda ah oo ay soo qoreen Madaxda Awooda u lihi.
2. Waaranka & Amarka lagu sheegay Xubinta hore waa la aqbalayaa iyagoo ku lifaaqan Gelitaanka & Haynta Maxaabiista ee Xabsiga.
3. Sarkaalka Madaxda ahi waa in uu hubiyaa in Maxbuusku yahay kan lagu sheegay Waaranka ama Amarka & in Waarankaasi leeyahay Shaabadii & Saxeexii Madaxdii qortay ee Awooda u lahayd & Arimaha kale ee Sharciga la Xidhiidha.
4. Sarkaalka Madaxda ahi waa in aaanu diidin in uu aqbalo ama qabto Maxbuus, khaladaadka Waaranka ama Amarku leeyahay darteed, waa in uu talaabo ka qaado sidii loo sixi lahaa khaladaadkaa, inta wax la Saxaayo Maxbuuska waxaa lagu haynayaa qolka soo dhawaynta.
5. Hadii aan Sharcigu si kale u sheegin, ilmaha yar ee ay wadato Naag Maxbuusad ahi ama laga Aqbalay, Dharka & Waxyaalaha kale ee lagama-maarmaanka ah ee ilmaha yar waxaa laga Bixinayaa Khasnadda Dawladda.